Edina Public Schools
QEEXITAANKA WANAAGSAN

Oggolaanshaha Maamulka Daawada Dugsiga Dawlada ee Edina

Ardayda u baahan daawaynta xiiqda, xasaasiyada daran, suuxdinta, ama sonkorowga, bixiyaha liisanku waa inuu dhamaystiraa qorshaha talaabada saxeexan.

Magaca Ardayga: _____ Taariikhda Dhalashada: _____ Dugsiga: _____

Waalidka/masuuliyiinta doonaya inay shaqaalaha dugsigu cunugooga siiyaan daawo waa inay siiyaan ogolaansho qoran sanad dugsiyeed kasta. Dhamaan ogolaanshaha waxay dhacayaan dhamaadka sanad dugsiyeedka ama xiliga xagaaga ee soo socda. Dhamaan daawayntu waa in lasiiyaa weel calaamadsan, oo asal ah.

Si uu u dhamaystiro dhakhtarka/qoraha sharciga haysta.				
Daawada	**Xadiga oo mg ah**	**Inta jeer/Wakhtiga**	**Waddada**	**Xaaladaha Caafimaad iyo ICD10**
Dhakhtarka/Saxeexa Bixiyaha Sharciyaysan:				**Taariikhda:**
Magaca Saxda ah ee Qoraha:			**Magaca Shaybaadhka:**	
Telefoonka:			**Faakis:**	

Ogolaanshaha Waalidka/Masuulka

1. Waxaan codsanayaa in daawaynta sare la siiyo inta lagu jiro saacadaha dugsiga sida uu codsaday dhakhtarka/daawo qoraha sharciyaysan cunugayg.
2. Waxaan codsanayaa in daawaynta lasiiyo safarada shaqada sida loo qoray. ☐ Haa ☐ Maya
3. Waxaan ogaysiin doonaa dugsiga hadii daawayntu joogsato.
4. Waxaan ogolaansho siiyay daawada in uu siiyo shaqaalaha dugsiga si loogu talagalay, ee loogu tababaray, ee uu kormeeray kalkaaliyaha dugsigu.
5. Sharci ahaan waxaan diidi karaa inaan saxeexo ogolaanshaha daawaynta foomka maamulka. Waxaan diiday inaan saxeexo, awood uma lihin inaan maamulno daawaynta.
6. Ogolaanshahan waa la joojin karaa wakhti kasta iyadoo loo dirayo ogaysiis qoraal ah kalkaalisada sharciyaysan ee dugsiga.

_____ _____

Saxeexa Waalidka/Masuulka Taariikhda

Ogolaanshaha Siidaynta Macluumaadka

1. Waxaan u fasaxay kalkaalisada dugsiga inay kala hadasho, hadba sida loogu baahdo, shaqaalaha dugsiga wax ku saabsan xaaladda caafimaad ee cunugayga iyo talaabada daawaynta si aan u bixiyo caafimaadka iyo baahiyaha badbaadada cunugayga markuu dugsiga joogo.
2. Waxaan u fasaxay kalkaalisada dugsigu inay la xidhiidho dhakhtarka cunugayga/daawo qoraha sharciyaysan wixii su'aalo ah ee ku saabsan daawaynta/ xaaladaha caafimaad ee kor ku xusan ee lagu dawaynayo dawooyinka.
3. Waxaan ogolaansho u siiyay dhakhtarka/daawo qoraha sharciga haysta si uu bixiyo macluumaadka la xidhiidha daawaynta iyo xaalada caafimaad ee ku aadan kalkaalisada sharciyaysan ee dugsiga.

_____ _____

Saxeexa Waalidka/Masuulka Taariikhda

Duugsiga Dawlada ee Edina: Qaadashada Daawada marka dugsiga la joogo

Markasta oo ay suurogal tahay, waalidka ama masuulka waa inay sameeyaan habayn markaa waxa aan suurogal ahayn in shaqaalaha dugsigu ay maamulaan daawada ardayga marka uu joogo dugsiga. Marka daawayntu ay daruuriga tahay inta lagu gudo jiro saacadaha dugsiga, ujeedadayadu waxa weeyi in aan hubino caafimaadka iyo badqabka ardayga. Waad ku mahadsantahay wadashaqayntaada.

Sanad kasta, kuwan soo socdaa waa inay raacaan markaaad u dirayso qoraal kasta oo daawo ama daawayn kasta oo aan qornayn dugsiga:

1. **Ogolaanshaha iyo saxeexa waalidka/masuulka ee dhamayskatiran** wuxuu u ogolaanayaa shaqaalaha dugsiga inay maamulaan daawayn. Daawayntu LAMA maamuli doono ama lama aqbali doono ilaa iyo la saxeexo amaro caafimaad IYO ogolaansho waalid oo saxeexan la siiyo xafiiska caafimaadka.

2. **Amar qoran oo ka yimid dhakhtarka oo ay la socdaan** tilmaamaha dhamaan daawooyinka, qoraalada iyo sida loo isticmaalayo. Amarka waxa lala xidhiidhi karaa dugsiga.

3. **Weelka asalka ah ee farmasiigu soo calaamadiyay.** Qoraalka daawadu, farmasiiluhu wuxuu siin karaa weel calaamadsan, mid guriga loogu talagalay iyo mid dugsiga lagu isticmaalayaba. Calaamada farmasiigu waa inay lahaa sidan soo scoota:
    - Magaca ardayga oo dhamaystiran,
    - Magaca dhakhtarka,
    - Magaca daawada iyo xadiga la qaadanayo,
    - Wakhtiga iyo tilmaamta sida loo isticmaalayo,
    - Taariikhda hada.

4. **Foom ogolaansho oo cusub ayaa loo baahanyahay marka:**
    - La badalo xadiga ama wakhtiga la qaadanayo
    - Bilawga sanad dugsiyeed kasta
    - Hadii lasii wadayo oo daawayn dib loo bilaabayo. Waalidka/masuulka waa inuu ogaysiiyaa dugsiga hab qoraal ah marak daawada aan lasii wadayn.

5. **Kaydinta:** Daawada uu maamulayo dugsigu waa in lagu kaydiyaa Xafiiska Caafimaadka. Kuwa ka reebani waa ardayda kuwaasoo leh xiiqda ama qalabka lagu cabiro daawada, hadii ay haystaan amarka dhakhtarka iyo ogolaansho qoran oo waalidka ka socda si aad u qabato oo aad tusto awooda kalkaasida dugsiga ee maamulka.

6. **Dhamaadka Sanadka ee Daawaynta Laqaadayo ama Latuurayo:** Dhamaadka sanad dugsiyeedka, dhamaan daawaynta waa inay ka qaadaan xafiiska caafimaadka waalidka/masuulka ama qofka wayn ee kamasuulka ah. Waalidka/masuulka waxa lagu dhiirigalinayaa inay si sax ah meesha uga saaraan daawooyinka aan loo baahnayn. Macluumaad dheeraad ah waxa laga heli karaa MN Wabsaaytka Xakamaynta Dikhawga. EPS waxay tuuri doontaa dhamaan daawooyinka aan la doonayn iyadoo raacaysa tilmaamaha saxda ah.

7. **Qaybta Kiniinada:** Shaqaalaha Adeega Caafimaadka kama masuul ah kala jabinta kiniinada kala badh. Marak uu jiro amar dhakhtar oo sheegaya in lasiiyo kala badhka kiniinka, lahadal farmasiilahaaga.

8. **Safarada Dibada/ Balaadhinta Waxbarashada:** Dhamaystir qaybta safarka dibada ee Foomka Ogolaanshaha Maamulida Daawaad. Ogolaansho dheeraad ah ayaa daruuri noqon doona habeenada dheeraadka ah iyo safarada lagu kordhiyay. Shaqaalaha Adeega Caafimaadku si joogto ah uma raacayaan ardayda safarada dibada ah tagaya oo waxa laga yaabaa in macalinku uu masuul ka noqdo maamulida daawada.

9. **Daawaynta Layslayaqaano:** Shaqaalaha Adeega Caafimaadka ayaa kaliya maamuli doona daawaynta ku liistaysan ee uu soo qoray Tixraaca Miiska Dhakhtarka Caadiga ah (PDR).

Siyaasada Dugsiga ee Daawaynta Edina